GGD Nederland

KAHORTAGA GUDNIINKA

Dhalinta caafimaadkooda iyo xanaaneentoda



# WAALIDKAYGA WAXAY YIRAAHDEEN ‘MAYA’

Warbixintaan waxaa loogu talagalay waalidka ka yimid Wadamada Gudniinka gabdhaha la ga yaqaano.

Warbixintaana waxaad ku heli kartaa luqadaha, Engles, Frans, Arabisch iyo Somalisch

## Warbixintaan waxay ku saabsantahay gudniinka gabdhaha

Da'yarta caafimaadkooda iyo xanaaneentoda, iyo dhaqtarka skoolada, waxay u fiirsadaan.

Caafimaadka iyo nabadgelyada caruurta jirta 0-19 sano ee Nederland. Waxaan u fiirsanaa.

Koritaanka ilmahiina waana talaalnaa. Waxaana kawada hadalnaa xitaa ilmaha sida ay skoolka, iyo.

Guriga ku yihiin, iyo sida uu ilmaha u barbaaro. Waxaa kala oo aan ka hadalnaa gudniinka gabdhaha.

Maxaayeelay gudniinka gabdhaha wuxuu u yahay qatar caafimaadka, halkaan ayaan kaga hadlaynaa arintaas.



### Waa maxay gudniinka gabdhaha?

Gudniinka gabdhaha waa qaliin lagu samaynayo xubinta taranka ee gabdhaha iyadoo caafimaad ahaan qasab ku ahayn. Hay ada caafimaadka ee caalamka (WHO) waxay u kala saartay noocyo kala duwan.

Nooca 1 Qaybta kore ee kintirka ama kintirka oo dhan oo la jaro. Waxaana la yiraahdaa. (clitoridectomie.)

Nooca 2 Kintirka iyo faruuryaha yar- yar oo kuligood la jaro ama qayb ka mid ah. Mar marka qaarkoodna faruuryahay waawayn xitaa waa la jaraa waxaana la yiraahdaa (excisie).

Nooca 3 Furuuryahay yar-yar ama iyo kuwa waawayn oo la jaro. Marar badan xitaa kintirka.
Waa la jaraa. Markaasna waa la isku tolaa. Waxaana la reebaa duleelyar. Waxaana la yiraahdaa Faracooni ama (infibulatie).

Nooca 4 Noocana waa inta kale oo lagu sameeyo xubinta taranka ee dumarka, iyada oo aan. Xaalad caafimaad qasbin. Tusaale hadii aan u ka soo qaadano waxaa ka mid ah:
Duris, wax sharaxaad la geliyo, ama wax lagu jaro ama la gubo.

Waxay ku xiran tahay dhaqanka dadkaas nooca gudniinka. Xitaa da'da lagu gudo gabdhaha Wadamadu way kala duwan yihiin laakiin inta badan caadada u horayso inta ay ku dhicin ayaa la gudaa.


# Tirakoopka iyo Diimaha

## Xagee ka yimid gudniinka?

100 ilaa 140 malyan gabdho iyo dumar oo aduunka ku nool way gudan yihiin. Taas waa 3,5% dumarka aduunka oo dhan. Inta ugu badan dumarka aduunka oo dhan ma gudna (96,5). Gudniinka gabdhaha waxaa laga helaa 28 wadan oo Afrika ah iyo Jemen iyo Koerdisch, Irak. Xitaa waxaa laga helaa wadama kale tusaale hadii aan u soo qaadano, Europa, Amerika iyo Australie.
Inta badan waxaa keenay dadk qaxootiga oo dhaqankoodii la yimid.

## Gudiinka gabdhaha iyo Diimaha

gudniinka gabdhaha waxaa ku dhaqmo Muslim, Kiristiyaan, iyo Qabiilo diimo kala duwan aaminsan. Laakiin waxaa kaloo jira wadamo kale oo badan oo Kiristiyaan, iyo Muslim ah oo laga aqoonin gudniinka gabdhaha, sida Marooko iyo Iran (Muslim) iyo Namibiya iyo Angola (Kiristiyaan). Gudniinka gabdhaha laguma sheegin Quraanka iyo Baybalka.
2006 culumo diinta ku xeeldheer waxay ku dhawaaqeen (fatwa ) oo ay ku mamnuuceen gudniinka gabdhaha. Waxayna u cuskadeen in qof muslim ah uusan wax yeeleen karin jirka bina aadanka.




*Laga helaa: Pharos, www.meisjesbesnijdenis.nl*

## Sabab?

Waalidku waxay u gudayaan gabdhahooda maxaa yeelay waa dhaqankooda. Maxaa yeelay qofkasta ayaa ku dhaqma, marka hadii gabar aan la gudin waxay la tahay wax ceeb ah. Waalidkana waxay ka baqayaan in gabadhooda wax guursado ay wayso iyo in mushtamacaas gabadhaas aqbalin. Dadka qaarkood waxay moodaan in gudniinka gabdhaha diintooda qabto. Taasna waxay keentaa in aan la badali karin dhaqankaas.



## Qatarta Caafimaadeed

Waxaa jira sababo muhiim ah oo ay u fiicantahay in aan gabdhaha la gudin. Hayada caafimaadka ee caalanka (WHO) way ka soo horjeeda noockasta oo gudniinka gabdhaha ah, maadaama uu dhibaato u gaysanayo gabdhaha.

**Dhibaatooyinka jireed oo uu keeni karo:**
- Xanuun aad iyo aad u badan
- Dhiig bax badan
- Infactie in uu ku dhicikaro
- Iyo gabadha oo dhiman karto.

**Dhibaatooyinka jireed oo uu ku reeban doono:**
- Dhibaatada caadada oo keento in caadado sidii loogu talagalay u soo bixin
- Kaadida oo dhibaato keenta
- Waxaa suurta gal ah in infekshin kaadida kaga dhaco iyo xubinta taranka
- Xanuun caloosha hoose ama (mindhicirada)
- Dhalis la'aan iyo kaadida oo la ceshen karin taaso ay keento infekshin;
- Meeshii latolay oo calaamad dhoqoto
- Dhiig bax badan marka dumarku ay dhalayaan
- Foosha dumarka gudan way ka dheer tahay kuwa aan gudneen.

**Dhibaatooyin oo u geesto dareenka:**
- Dareenka oo dhamaado ama yaraado
- Xanuun marka la isku tagaayo
- Halkaas oo dumarku dhibaato kaga timaado xiriirka ninkeeda.

**Dhibaatooyinka maskixiyeed:**
- Xasuus xun oo gudniinkii ku saabsan, marmarna, qalbi fug ku reebta
- Isku buuqdo.

## Runtii

### Xaqiiqada iyo sheekooyinka aan xaqiiqada aheen oo ku saabsan gudniinka gabdhaha

Gudniinka gabdhaha waxaa laga sheegaa sheekooyin badan oo aan run ahayn. Halkaan hoos waxaad ka heli kartaa qaar ka mid ah. Waxaan kaloo ku darnay kuwa Xaqiiqada ah.

| Waxaa la yiraahdaa ... | Xaqiiqada ... |
|---|---|
| ... gudniinka gabdhaha waa qasab waa diinteena. | ... Majirto Diin qasbaysa in gabdhaha la gudo. Gudniinka gabdhaha wuxuu jiri jiray diimaha hortood. Quraanka iyo Baybalka midna laguma sheegin gudniinka gabdhaha. Waa wax qarniyo badan soo socday oo dhaqan iyo caado noqday. |
| ... gudniinka gabdhaha waa sida wiilasha oo kale. | ... Gudniinka gabdhaha lama mid aha midka wiilasha.<br>... Gabdhaha gudniinkooda sababkale ayey leedahay. Gabadha waxaa loo gudayaa in dareenkeeda dumarnimo la yareeyo. Wiilashana waxaa loo gudaayaa nadaafad awgeed. |
| ... gudniinka gabdhaha waa xalaaleeyaa, waxuu dhowra gabadha bikradeeda, gabadhana markay guursato gogol dhaaf ka ma samaynayso ninkeeda. | ... Gabadhaha dhaqankeeda waxaa xukuma sidii lookoriyo iyo shaqsiyadeeda iyo dadnimadeeda<br>Ee ma ahan gudniinka ama jirkeeda oo la naafeeyo. |
| ... kintirkana wuu waynaanayaa hadii aan la gudin gabadha. | ... mana aha kintirku xubin xad dhaaf u koraysa. |



| Waxaa la yiraahdaa ... | Xaqiiqada ... |
|---|---|
| ... Gudniinku wuxuu keenaa in gabadhu dhalmo badiso. | ... Gudniinka gabdhaha ma kor dhiyo taranka, Gudniinku wuxuu keeni karaa infekshin, kaasoo gabadha ka dhigi karo wax madhasho. Fooshana iyo dhalitaankana wuu ka dhib badan yahay, taasoo keeni karta dhimasho ilmihii ama hooyada oo la yiraahdo (Umul raac). |
| ... Dumarku markay dhalayaan hadii ilmaha madaxooda kintirka taabto way dhimanayaan. | ... Waxaa jira milyanyaal dumar aan gudneen oo fooshooda iyo ilmaha ay dhalaan caafimaadkoodu wanaagsanyahay. |
| ... Dadku waa in ay dhaqanka iyo caadadooda ayna ka tagin oo xushmeeyaan. | ... Waxaa jira dhaqan caafimaadka u wanaagsan, iyo mid aan u wanaagsanayn, kan wanaagsan waa ilmaha oo naaska hooyada nuuga ama ilamaha oo dhabarka lagu xambaaro. Gabdhaha oo la gudo waa dhaqan caafimaadka aan u wanaagsanayn. Marka dadka ayaga ayaa dooran karaan in ay wataan dhaqanka caafimaadka u wanaagsan, kana tegi kara midka aan caafimaadka u wanaagsanayn. |

# Sharciga

## Nederland

Nederland waa ka mamnuuc nuuc kasta oo gudniinka gabdhaha. Waxaana lagu xukumayaa xarig gaaraya ilaa iyo 12sano ama lacag ganaax oo gaari karta ilaa iyo €76.000. Waxaa dhici karta in xarig ka badan taas la siiyo waalida iyaga gacantooda ku guda ama amarka bixiyo oo lagu guday gabadhooda. Hadii waalidku gabadhooda wadan kale ku soo gudaan, xitaa Nederlaan waa lagu xukumidoonaa.

Sharcigaan wuxuu qabanayaa qofkasta oo wadankan Nederland degan, xitaa dadka aan sharciga degenaanka aan lahayn. Dadka gabadhooda guda oo aan weli qaadan dhalashada Nederland waxaa laga yaabaa in aan loo ogolaan in ay sii degenaadaan wadanka Nederland.

Dumarka ilaa iyo 38sano ay ka gaaraan ayay dacwayn karaan wixii guday.

## Afrika

Qaydhuunka la yiraahdo Maputo=protocol oo bilawday 2005 wuxuu qurayaa xaquuqda dumarka Afrika. Waxaa qoray Afrikada Midowday waxay cadeeyeen in Raga iyo Dumarka isku mid yihiin. Waxayna mamnuuceen in lagu sameeyo dumarka wax walba oo dhibaatooyin u keenayo qaasatan caafimaadkooda, gaar ahaan Gudniinka gabdhaha. Wadama badan way qaateen, laakiin kuwa badan weli maqaadan xeerkaas.

***Qaynuunka Afrikanka. Ku dhaqanka xaquuqda bina aadanka iyo xaquuqda dumarka Afrika.***

**Xeerka 5b Joojinta dhaqanka dhibaatada leh**

Wadamadaas waa in ay mamnuucaan wax walba oo ku dhaqankooda dhibaatooyin keenaaya
Kuwaas oo xaquuqda bina aadan nimo iyo xaquuqda dumarka u xun.

b) sida sharci mamnuucayaan wax walba oo xubinta taranka dumarka dhibaatooyin u gaysanaya.



## Caddeynta kasoo horjeedidda Gudniinka Gabdhaha

Waalidka qaarkiis marabaan in ay gabdhahooda gudaan , laakiin familigooda ayaa raba. Marka waalidkaasna way ku adak tahay in ay familigooda yiraahdaan 'maya'. Si loo caawiyo waalidkaas , dowladu waxay samaysay warqad cadayn ah. Taasoo ah Caddeynta kazoo horjeedidda Gudniinka Gabdhaha. Waxaana kuyaal in Gabdhaha Gudniinkoodu wax yeelo u geesto caafimaadka. Waxaa kaloo ku yaalo in Nederland mamnuuc oo ka yahay oo waalidiintana dhibaato uga imaanayso, hadii gabadhooda ay gudaan. Marka taasu waa cadayn la tusi karo familiga.
Caddayntaas ka soo horjeedista Gudniinka Gabdhaha waxaa lagu turjumay 7 luqadood. Nederland, Englels, Frans, Arabisch, Somalisch, Amhaarsen en Tigrinya. Waxaad ku helaysaa lacag la'aan, waxaadna ka helikartaa hayadda qaabilsan dhalinta caafimaadkooda iyo xanaaneentooda.(Consultatiebureau of GGD).

## Xageed ka heli kartaa warbixin?

Cinwaanka hoos ku qoran waxaad ka heli kartaa warbixin:
**www.tegenvrouwenbesnijdenis.nl**
**www.meisjesbesnijdenis.nl** (halkaas waxaad kaloo ka heli kartaa Fatwa (Culumada waxa ay ka qabto) oo luqado kala duwan.)

## Xageed ka heli kartaa hadii aad u baahatid dad aad kala hadasho

Hadii aad rabtid in aad dad kala hadashid gudniinka gabdhaha, waxaad la xiriiri kartaa:

- Hay ada qaabilsan dhalaanka iyo dhalinyarada caafimaadkooda iyo xanaaneentooda. (Consultatiebureau ama GGD)
- FSAN, oo aad helikarto Talaadada, Arbacada, iyo Khamiista, saacadaha aad helikartana waa 11:00 ilaa 16:00saac, Telfoonkana waa 020-4861628 ama e-mail: info@tegenvrouwenbesnijdenis.nl
- Warbixin iyo talona waxaad kaloo kaheli kartaa Pharos. Waxaana la wici karaa Talaado, iyo Khamiis saacadaha la heli karo waa 10:00 ilaa 14:00saac telefoonka laga helikaro waa 030-2349800 e-meil xitaa waad u dirikartaa: focalpointmeisjesbesnijdenis@pharos.nl
- Dadka dhexdhexaadiyayaasha oo loo yaqaan (sleutelpersoon) waxaad kala xiriiri kartaa FSAN (dalada eey hoos tagaan ururada somalida ee Nederland).

FEDERATIE SOMALISCHE ASSOCIATIES NEDERLAND

Nederland

www.fsan.nl

www.ggd.nl